Victims Information

Dadka uu saameeyey gacan ku dhiigle

NIDAAMKA CADAALADA DENBIILAHA
WAXAA KU DHACA IYO SIDA LOO HELO TAAGEERADA

Xaanshida xaqiiqda waxay sharaxeysaa taageerada aad heli kartid iyo cidda aad weydiisan kartid caawin haddii ay ku saameysay isdilka.

In aad ku waydo qofaad aad u jeclayd dilis waa waayo aragnimo jidh dil maskaxeed. Taageerada saxda ah waxay kugu caawin kartaa adiga iyo qoyskaaga iyo qoyska aad la nooshahay la macaamilaan saameynta dambiga. Waxaa jira hay'ado aagagaaga ah oo ku siin karo taqasuska taageerada dareenka iyo waxqabadka.

Si aad u heshid warbixin badan, ka soo wac Qadka Warbixinta Dhibanayaasha ee 0800 650 654. Sidoo kale fiiri dhammaadka xaanshidaan xaqiiqda oo xiriirada kale ee muhiimka ah oo ku jahey qaar ka mid ah erayada aad ku maqleysid maxkamada.

Xuquuqaha dhibanaha

Waxaad xaq u leedahay in wax lagaaga sheego adeegyada adiga ku caawin karo, lagula socodsiiyo hormarka dacwada iyo ogaanshaha waxa la filanayo markii aad maxkamad aadid.

Waxaad xaq u leedahay inaad maxkamada wax uga sheegtid sida dambiga kuu saameeyay. Haddii aad tahay dhibnaha xadgudubka ee canuga ama qofka dhalinyaro ah, waxaad xaq u leedahay inaad ka qeybgashid shirka kooxda qoyska oo aad wax ka dhahdid waxa aad rabtid inaad aragtid.

Dacwadaha qaarkood, adiga ama wakiilkaaga waxaad xaq u leedihiin inaad wax ka dhahdaan waxyaabaha sida qarsoodiga magaca, damaanada, amarada kormeerida la kordhiyay ama siideynta sharuuda.

Waxaad filan kartaa ixtiraam, naxariis iyo adeeg ixtiraamsan ee saraakiisha maxkamada, booliska iyo qof walboo kale ee ku lugleh dacwada. Waxaad xaq u leedahay qarsoodi.

Xeerka Dhibanayaasha wuxuu leeyahay warbixin badan oo ku saabsan xaquuqahaaga iyo daaweynta aad filan kartid. Si aad wax badan uga ogaatid, booqo victimsinfo.govt.nz

Haddii aad aaminsantahay in xaquuqahaaga aan la buuxin, ama aadan helin heerka adeega aad filaneysid, waxaad sameyn kartaa cabasho. Booqo victimsinfo.govt.nz ama ka soo wac Qadka Warbixinta Dhibanayaasha ee 0800 650 654.

Baadhitaanka

Baadhitaanka gacan kudhiigluhu aad bay ugu adag tahay qoyska iyo saaxiibada dhibanaha. Haddii qof ka mid ah qoyskaaga ama qoyska aad la nooshahay uu ahaa dhibanaha isdilka, helidqa taageerada saxda ah aad ayay muhiim u tahay.

Bilayska ayaa u xilsaari doona qoyskaaga sarkaalka isi-xidhka dhibanaha. Waxay hubinayaan inaad ogtahay waxa ka dhacayo illaa baaritaanka iyo dacwada maxkamada. Waxaa sidoo kale u suurtogaleyso inay ka jawaabaan su'aalo walba oo aad qabtid oo aad la xiriirtid hay'adaha taageerada taqasuska.

Inkastoo ay aad ugu adag tahay qoyska, qofka dhintay wuxuu u baahan karaa inuu joogo halka ay joogaan illaa cadeynta la isu keeno. Dhakhtar khabiira, oo loo yaqaan takhasusaha barashada cilmiga cudurada, ayaa sidoo kale sameyn doona baadhitaan. Tani waa in la uuriyo caddaynta muhiimka u ah dacwada maxkamada.

Baadhitaanka gacan ku dhiigluhu waxaa suura gala in ay qaadato waqti dheer. Bilaysku waxay u baahan yihiin in la tuso waxaa dhacay, cida ka masuulka aheyd iyo waxa ay ujeedadoodu aheyd. Sarkaalka xafiiska dhibanahaaga ayaa ogeysiinayo qoyskaaga oo ku caawinayo iyada oo aad diyaarineysid duugta ama tacsida, oo aad sameysid diyaarinada kale.

Xilliga lagu jiro baadhitaanka, bilaysaka ayaa waraysan doona qoyskaag, iyo dadka kale, marka lagu daro caddayn ururinta sida sawirada iyo baadhitaanka cilmiyeed ee denbiga. Haddii booliska ay hayaan cadeyn ku filan, waxay xirayaan qofka oo ay ku eedeynayaan xadgudubka dambiilaha.

DAMAANADA

Markii qof la xero, way ka siideyn karaan illaa illaa ay ka aadaan maxkamada. Tan waxaa lagu magacaabaa - damiin maal. Mararka qaar waxaa jiro sharuudo ku saabsan halka qofka ku noolaanayo, oo waxay yeelan karaan bandow. Haddii booliska u maleeyo in adiga ama qof kale ee bulshada uu halis ku jiro, qofka waxaa lagu hayn karaa xabsiga illaa ay ka imaadaan maxkamad, markaas oo ay codsan karaan damaanad markale.

DIIWAANIYAHA OGEYSIINTA DHIBANAHA

Waxaad heleysaa fursada aad aragtidaada ku dhiibatid oo ku saabsan ku siideynta qofka damaanad (sidoo kale "Waad u sheegi kartaa Guddiga Siideynta sharuuda sida aad ka dareentid siideynta dambiilayaasha" dhammaadka xaashidaan xaqiiqda).

Waad dooran kartaa inaad ka qeyb ahaatid Diiwaaniyaha Ogeysiinta Dhibanaha si markaas laguu ogeysiiyo waxa ku dhacay dambiilaha xukumida kadib. Waad dooran kartaa in qof kuu helo warbixintaan, haddii aad rabtid. Warbxintaada way dhawrsanaan doontaa.

Si aad u hubisid in sharaxaadaha warbixintaada ay ku cusubtahay diiwaaniyaha, la xiriir booliska, Waaxda Asluubta ama hay'ada taageeradaada. Si aad wax badan uga ogaatid, booqo victimsinfo.govt.nz

Garsooraha waa inuu fiiriyaa waxyaabo badan markii ay xukumaan dambiilaha, sida xukumadee ayaa la siiyay ee dambiyada kale ee la midka ah, wargelinada ku saabsan dambiilaha, iyo bayaana walboo saameynta dhibnaha.

BAYAANKA DHIBAATADA DHIBANAHA

Haddii aad tahay dhibanaha dambiga, waxaa lagu weydiinayaa haddii aad rabtaan inaad sameysaan bayaanka saameynta dhibanaha. Tani waxay u sheegeysaa maxkamada sida dambiga kuu saameeyay. Sarkaalka masuulka ka ah dacwadaada, Taageerada Dhibnaha ama hay'ada taageerada kale ayaa kugu caawin karo qorista midaan. Sidoo kale ka fiiri "Go'aanka iyo xukunka" Xaanshidaan xaqiiqda.

Taageerada

Waxaa jiro adeegyada taageero badan oo loo heli karo inay ku caawiyaan:

ADEEGA TAAGEERADA SHAQAALAHA DACWADA TAAGEERADA DHIBANAHA ISDILKA

Kani waa adeega taqasuska oo ku caawinayo adiga iyo qoyskaaga iyo qoyska aad la nooshahay inta lagu jiro nidaamka oo ay ku jiraan kadib markay dacwada dhammaato. Waxay hubineysaa inaad heshid taageerada warbixinta aad u baahantahay. Booliska wuxuu kula xiriirinayaa adeegaan ama waxaad soo wici kartaa Taageerada Dhibanaha ee 0800 842 846.

TAAGEERADA LATALINTA KHABIIRKA

Qoyska iyo saaxiibada dhibanayaasha isdilka, markhaatiyada iyo qofka kale oo markii koowaad goobta isdilka joogay waxay heli karaan illaa 30 kulamo oo la talinta taqasuska. La xiriir Taageerada Dhibanaha si aad u ogaatid haddii aad u qalantid iyo sida loo codsado.

DENBIYADA DHALINYARADA

Haddii dambiga uu sameeyay qof ka hooseeyo 17 sanno jir, arinta waxaa lagula macaamilayo dhinaca nidaamka cadaalada dhalinyarada. Dhibanayaasha aad ayay muhiim u yihiin qeyb ka mid ah nidaamkaan oo waxaad leedahay xaquuqda aad uga qeybgashid shirka kooxda qoyska.

Xiriiriyaha kooxda qoyska ee ka socdo Oranga Tamariki - Wasaarada Carruurta ayaa kula soo xiriirayo.

TAAGEERADA DHAQAALAHA

Deeqaha dhaqaalaha waa laguu heli karaa si ay kaaga caawiso daboolida qaar ka mid ah qarashaadka la xiriiro dambiga. Si aad u hubisid haddii aad aad heli kartid deeq oo aad ogaatid sida loo codsado, la xiriir Taageerada Dhibanaha ee 0800 842 846.

- Illaa $5000 ayaa la heli karaa si loo yareeyo saameynta isdilka oo qoyska u dhow. Caawinta waxay daboolaysaa dakhli lumista iyo kharashaadka guud.
- Deeqda $124 oo maalintii ah ($62 oo maalin barkeeda) waxaa loo heli karaa illaa 5 xubnaha qoyska dadka weyn oo ka qeybgalayo dhageysiga Maxkamada Sare.
- Taageerada dhaqaalaha waxaa loo heli karaa safarka, hoyga iyo qarashaadka la xiriiro oo illaa 6 qof oo ka qeybgalayo maxkamada iyo dhageysiyada Guddiga Siideynta sharuuda.
- Illaa $10,000 ayaa loo heli karaa in lagu caawiyo qarashaadka duugta. La xiriir ACC si aad u codsatid.

Waxaa sidoo kale kuu suurtogeli karto inaad ka heshid taageerada dhaqaale kale Shirkada Magdhowga Shilka (ACC). Weydii hay'adaada taageerada si aad wax badan uga ogaatid ama soo wac Qadka caawinta Sheegashooyinka ACC 0800 101 996.

Meesha maxkamada

Eedeysanaha (qofka lagu eedeeyay dambiga) wuxuu malaha imaanayaa maxkamada dhoor jeer, tusaale ahaan, in la qirto dambiile ama aan la qiran dambiga ama si garsooraha u eego cadeynta dacwada. Suurtogal ma ahan inay qasab tahay inaad ka qeybgashid dhammaan maqaladaan, laakin waad aadi kartid haddii aad rabtid. Lagaama rabo inaad joogtid maxkamada oo maqalka xukumista.

Haddii eedeysanaha dambiga qirto, waxaa laga wadaa inay qirteen sameynta dambiga lagu soo dalacay. Maxkamada waxay kadib go'aansaneysaa ciqaabtee (xukunkee) dambiilaha la siinayaa.

Waxay ku xirantahay halista eedeymaha, maxkamada waxay u xukumi kartaa dambiilaha si toos ah, ama amreysaa wargelinta xukunka ka hor xukumista eedeysanaha oo taariiq dambe ah. Wargelinadaan waxaa diyaariyo saraakiisha kormeerida iyo caadi ahaan qaado dhoor isbuuc oo aad ku diyaarisid.

Dacwadaha qaarkood, waxaa lagu siinayaa fursada looga qeybgalayo shirka soo celinta cadaalada.

Haddii eedeysanaha uusan qiran dambiga, xeer illaaliyaha ayaa u soo bandhigayo dacwada garsooraha iyo xeerbeegtida. xeer-ilaaliyaha u shaqeeya dawlada ayaa ka masuula xeer ilaalint dacwadaha isa goo ku metalaya Xeer -ilaaliyaha gobolka, bilayska iyo dadweynaha. Waxaad u baahan kartaa inaad marqaati ka ahaatid Crown si aad uga caawisid cadeynta dacwada ka soo horjeedo eedeysanaha - fiiri "Marqaati ahaanshaha" ee xaanshidaan xaqiiqda.

Xeer illaaliyaha yaa kula kulmayo adiga iyo qoyskaaga iyo qoyska aad la nooshahay oo kuu sheegayo isbadelada la dhigayo iyo sababta, iyo waxa u dhow inay ka dhacaan maxkamada. Waxay ku xirantahay xaaladaha dacwada, eeda waxay noqon kartaa dil ama dilka kama'a ah. Xeer illaaliyaha ayaa midaan kuu sharaxayo.

Maxkamada waxay sameyn kartaa amarka ka illaalinayo qof walba daabacaada magaca dhibanaha ama sharaxaado walba oo aqoonsan karto dhibanaha. Xeer illaaliyaha ayaa midaan kuu sharaxayo.

CAAWINTA LUUQADA AMA CURYAANNIMADA

U sheeg la taliyaha dhibanaha maxkamadaada, sarkaalka xafiiska dhibanaha booliska ama shaqaalaha taageerada shaqsigaaga haddii aad u baahantahay caawinta fasiraada luuqada ama helitaanka curyaannimada.

BADBAADADAADA EE MAXKAMADA

Ammnigaagu waa muhiim Haddii aad ka walaacsantahay wax ku saabsan badbaadada maxkamada, la hadal sarkaalka booliska ama sarkaalka amniga, ama ogeysii la taliyahaaga dhibanaha ka hor intaadan imaanin maxkamada.

Mararka qaar warbaahinta waxay qaadan kartaa dano gaar ah ee dacwada iyo qaabka adiga iyo qoyskaaga iyo qoyska aad la nooshahay uga faaloodaan. Sarkarkaaga isku–xidhka bilayska iyo dhibanaha ayaa kuu sheegi doona sida loola gudhiyo saxaafada.

LA TALIYAHA DHIBANAHA MAXKAMADA

Markii eedeysanaha sameeyaan imaanshahooda koowaad ee maxkamada,la taliyaha dhibanaha maxkamada ayaa kula xiriirayo adiga. Waa shaqadooda inay ku soo ogeysiiyaan wax ku saabsan hormarka dacwadaada oo kaa caawiyo dhinaca nidaamka maxkamada. Waxay sidoo kale kuu sheegi karaan halka laga helo taageerada dhaqaalaha iyo dareenka.

La taliyaha dhibanaha maxkamada, sarkaalka xafiiska dhibanaha booliska, ama shaqaalaha taageeradaada waxay halkaas u joogaan inay kuu sharaxaan wax walba oo aan kuu cadeyn.

Wax badan ka ogow victimsinfo.govt.nz. Ama si toos ah ula xiriir la taliyaha dhibanaha maxkamadaada, ama dhinaca Qadka Warbixinta Dhibanayaasha 0800 650 654.

Inaad noqoto markhaati

Inta lagu jiro maxkamad saarida, adiga iyo xubnaha qoyskaaga iyo qoyska aad la nooshahay waxaa loogu yeeri karaa marqaati ahaan. Marqaati ahaanshaha waxay noqon kartaa mid murugo leh. Xeer illaaliyaha iyo la taliyaha dhibanaha maxkamadaada ayaa kuu sharxi karo waxa ku lug leh iyo waxa la filanayo. Waxaad sidoo kale caawin ka heli kartaa sarkaalka xafiiska dhibanaha booliska.

MAXKAMADA HORTEEDA

Sarkaalka xafiiska dhibanaha booliska ama la taliyaha dhibanaha maxkamada ayaa kuu sheegayo goorta iyo halka aad ka joogeysid maxkamada. Waxaad sidoo kale heleysaa u yeerid rasmi ah oo gurigaaga la soo gaarsiiyo.

Xeer illaaliyaha ayaa kaala hadlayo waxa aad u baahantahay inaad u sameysid marqaati ahaan. Waxaad sidoo kale weydiin kartaa inaad booqatid qolka maxkamada waqtiga ka hor. La hadal la taliyaha dhibanaha maxkamadaada, sarkaal xafiiska dhibanaha booliska ama shaqaalaha taageerada diyaarinta midaan. Sidoo kale, u sheeg la taliyaha dhibanaha maxkamadaada ama sarkaalka xafiiska dhibanaha booliska haddii aad rabtid inaad diyaarisid:

- qof kula kulmo adiga ama banaanka maxkamada
- qof ku taageero oo kula fariisto markii aad cadeynta bixineysid.

MEESHA MAXKAMADA

Waxaa lagu weydiinayaa su'aalo ku saabsan waxa dhacay ama waxa aad ka ogtahay dambiga.

Markii aad cadeynta dhiibtid, waxaa caadi ahaan kuu suurtogaleyso inaad aragtid eedeysanaha, illaa aad ka dhiibeysid cadeyn shaashada gadaasheed ama dhinaca CCTV.

Inta badan maxkamadaha, waxaa jiro aagaga sugitaanka kala gooni ah oo dadka loogu yeeray marqaatiyada, laakin waaa suurtogal inaad arkeysid qoyska ama saaxibada eedeysanaha gudaha ama agagaarka maxkamada.

Waa muhiim inaad haysatid taageero markii aad marqaati tahay labadaba maalintaas ka hor iyo kadib. La hadal lataliyaha dhibanaha maxkamada ama shaqaale taageere helida taageeraa ee adiga kuu fiican.

Go'aan maxkamadeed iyo xukun

Dhammaadka maxkamad saaraida, eedeysanaha waxaa lagu helayaa dambiile ama aan lagu helin dambi. Mararka qaar maxkamada waxay ogaan kartaa in eedeysanaha uusan dambiile aheyn oo sababta jirada maskaxda.

Dacwadaha qaar, tusaale ahaan, halka xeerbeegti aysan gaarin go'aan, waxaa jiri karo maxkamad saarid kale.

Haddii qofka qirto dambiga ama lagu helo dambiga, waxaa la xukumayaa taariiq dambe. Sarkaalka xafiiska dhibanaha booliskaaga, la taliyaha dhibanaha maxkamada ama xeer illaalyaha ayaa kuu sheegayo goortii xukumista ay u balansantahay inay dhacdo.

Haddii eedeysanaha aan lagu helin dambiga oo sababta jirada maskaxda, waxaa lii xiro karaa in lagu daaweeyo xarunta caafimaadka maskaxda oo illaalsan. Xiriiriyaha dhibanaha ee ka socda xarunta ayaa kula soo xiriirayo si kuugu sharaxo waxa midaan la micnatahay.

XUKUMID

Garsooraha waxaa sharci ahaan looga baahanyahay inay tixgeliyaan xaqiiqo badan oo xukunka dambiilaha, sida xukumada loo siiyay dambiyada la midka ah ee ku saabsan eedeysanaha.

Haddii garsooraha ogolaado, adiga (ama qof aad dooratay) ayaa kuugu aqrin karo bayaanka saameynta dhibanaha oo dhan ama qeyb ah maxkamada oo dhageysiga xukumista. Weydii la taliyaha dhibanaha maxkamadaada ama sarkaalka xafiiska dhibanaha booliska si uu kuugu weydiiyo garsooraha. Garsooraha waxaa looga baahanyahay inuu tixgeliyo bayaankaaga saameynta dhibanaha markii xukumayo dambiilaha.

RAFCAANKA

Xeer ilaaliyaha iyo xad gudbuhuba waxay xaq u leeyihiin in ay rafcaan ka qaataan go'aanka maxkmadeed iyo xukunka. Tan macmaheedu waxaa weeye maxkamada sare ayaa darsi doonta dacwada mar labaad. Haddii tani ay dhacdo, xeer illaaliyaha wuxuu ku ogeysiinayaa wax ku saabsan nidaamka.

Maxkamada kadib

Markii lagu helo dambiga, dambiilaha waa la xukumayaa. Fahamka xukunada marwalba ma sahlano. Sarkaalka xafiiska dhibanaha booliskaaga ama la taliyaha dhibanaha maxkamadaada ayaa kuu sharaxi karo waxa xukunada laga wado.

KA SIIDEYNTA XABSIGA

Dambiilayaasha waxaa looga siidaayaa xabsiga midkood siideynta sharuuda ama markii xukunadooda dhammaadaan. Tani way ka soo hormari kartaa sida aad filaneysid, sababtoo ah waqtiga ay ku isticmaaleen xabsiga ka hor inta aan la xukumin ama aan la taxaabin waxaa loo xisaabiyaa sida ka qeyb ah xukunka.

Haddii xukunka dambiilayaasha dhammaado, waa laga siideynayaa xabsiga. Laguma hayn karo xabsiga kadib markuu xukunkooda dhammaado.

Dambiilaha waxaa laga siideyn karaa xabsiga ka hor inta uusan xukunkooda dhammaan haddii la siiyo siideynta sharuuda. Guddiga Siideynta sharuuda New Zealand waxay eegayaan dacwada inta badan dambiilayaasha oo go'aansadaan haddii siideynta hore ee dambiilaha ay ku soo rogeyso halis weyn badbaadada bulshada.

Haddii dambiilaha dambi dilka ah lagu helo, waxaa lagu soo rogayaa ugu yaraan muddada siideynta sharuuda oo 10 sanno.

Dambiilayaasha waxay inta badan buuxinayaan sharuudaha qaarkood kadib markii lagu siidaayo siideynta sharuuda. Sharuudaha waxaa dajiyo Guddiga Siideynta sharuuda ama garsooraha xukumay dambiilaha. Sharuudahaan waxay dabooli karaan halka ay ku noolaan karaan, cida ay ay la xiriiri karaan, halka ay bandow ku leeyihiin, iyo xaqiiqo kale oo ku caawinyo illaalinta bulshada.

WAAD U SHEEGI KARTAA GUDDIGA SIIDEYNTA SHARUUDA SIDA AAD KA DAREENTID SIIDEYNTA DAMBIILAYAASHA

Si aad hadalkaaga u dhahdid ka siideynta hore xabsiga ee dambiilayaasha, waa inaad iska diiwaangelisaa Diiwaaniyaha Ogeysiinta Dhibanaha.

Waxaad ugu sheegi kartaa qoraal ahaan Guddiga Siideynta sharuuda sida aad dareentay, dhinaca shirka fiidiyaha ama qof ahaan:

- **Qoraal ahaan ama dhinaca shirka fiidiyaha**
  Kala hadal xiriirkaaga Guddiga Siideynta sharuuda.
- **Qof ahaan**
  Guddiga Siideynta sharuuda ayaa kula kulmayo. Waxaad la hadleysaa isla dadka arkayo dambiilaha, laakin dhageysiga aad ka qeybgaleysid ma ahaanayo xabsiga oo eedeysanaha ma joogayo halkaas. Waad la imaan kartaa dadka taageerada.

MAXKADA BAADHA SIDA IYO SABABTA UU QOFKU U DHINTAY.

Sidoo kale sida dacwada maxkamada, baaraha dambiga ayaa baarayo dacwada oo waxaa jiri karo dhageysiga Maxkamada Baaraha dambiga. Tani waa maxkamad gaara oo darista sababaha iyo xaaladaha qof dhimashadiisa iyo haddii uu jiro shay la qaban karo si looga hortago dhimasho xaalado la mida.

Adeegyada Baaritaanka dambiga Wasaarada Cadaalada ayaa ku soo ogeysiinayo dhageysiga ka hor, iyo sarkaalka xafiiska dhibanaha booliskaaga ayaa sidoo kaale hadlayo dhageysiga. Adiga iyo qoyskaaga waxaad aadi kartaan dhageysiga Maxkamada Baaritaanka dambiga, laakin looma baahno illaa lagu weydiiyo inaad cadeyn bixisid.

Taageerada dadka ayaa kuu iman karta adiga dacwad dhegaysiga i Maxkada baadha sida iyo sababta uu qofku u dhintay. Soo wac Taageerada Dhibanaha 0800 842 846 ama Qadka Warbixinta Dhibanayaasha ee 0800 650 654 si aad u diyaarisid midaan.

Meelaha muhiimka ee xidhiidhka

Waxaa jiro taageero aad heli kartid heer walba oo kaa caawiyo inaad la macaamishid saameynada dambiga. Hoos waa sharaaxadaha xiriirka qaar ka mid ah adeegyada ugu muhiimsan. Waxaad ka heli kartaa warbixin badan oo ku saabsan adeegyada adiga oo soo wacayo Qadka Warbixinta Dhibanayaasha 0800 650 654 (24/7) ama adiga oo booqanayo victimsinfo.govt.nz

ACC
acc.co.nz
Qadka caawinta Sheegashooyinka 0800 101 996
Qadka caawinta Sheegashooyinka Xasaasiga 0800 735 566
(wixii dhibanayaasha rabshada galmada)

La taliyaasha Dhibanaha Maxkamada
Qadka Warbixinta Dhibanayaasha 0800 650 654

Waaxda Sixitaanka
04 460 3000
corrections.govt.nz

Guddiga Siidayn Sharafeedka Maxbuuska New Zealand
0800 PAROLE (727 653)
paroleboard.govt.nz

Taageero Gaarkaa
Fiiri victimsinfo.govt.nz

Bilayska
Waxaad ka heli kartaa saldhiga booliska deegaankaaga ee police.govt.nz

Taageero Dhibane
0800 VICTIM (842 846) 24 saacadood maalintii
victimsupport.org.nz

Hoyga Qaxootiga Dumarka
0800 REFUGE (733 843) 24 saacadood maalintii
womensrefuge.org.nz

Qadka luuqada adeegyada fasiraada
0800 656 656
9am–6pm Isniinta–Jimcaha, 9am–2pm Sabtida

Erayada qaar aad ka maqli kartid maxkamada

Damaanada
Markii booliska ku siidaayaan sharuudo qof lagu eedeeyay dambi oo sharuuda ah inay ka qeybgalaan dhageysiyada maxkamada mustaqbalka.

Baaraha dambiga
Baaraha dambiga ayaa aasaaso goorta, goobta, sida iyo sababta dhimashada u dhacday. Waxay sidoo kale ka shaqeynayaan haddii wax walba la sameyn karo oo lagu joojiyo dhimashooyin noocaas ah.

La taliyaha dhibanaha maxkamada
Xubinta shaqaalaha Wasaarada Cadaalada oo kuu sharaxi karo nidaamyada maxkamada oo ogeysiiyo dhibanayaasha wax ku saabsan nidaamka dacwadooda.

Eedeysanaha
Qofka lagu eedeeyay dambiga.

Gacan ku dhiigle
Goorta qof uu dilo qof kale.

Dambiile
Qofka lagu xukumay dambiga. (Ka hor inta aan lagu heli dambiga, qofka waxaa lagu eedeeyaa xadgudubka waxaa loo yaqaan 'eedeysane'.)

Siidayn sharafeed
Markii dambiilaha kale loo ogolaado inuu ka baxo xabsiga si ay ugu dhameysteen xukunkooda bulshada dhexdeeda. Waa inay raacaan sharuudaha qaarkood.

Cadaalada rayn-rayn leh
Soo celinta cadaalada waxay dhibanayaasha u sheegtaa in dambiilaha sida ay u saameysay, hadal ka dhahaan sida waxyeelada loo sameyn karo, oo bilaabo xalinta qaar ka mid ah saameynada dambiga. Kulanka waxaa loo yaqaan shirka soo celinta cadaalada.

Dembiga halista ah
- Dambiga nooca galmada ama weerarka kale ee halista ah.
- Dambiga sababay dhaawac halis ah ama dhimasho.
- Dambiga u hogaamiyay inay ku sababaan cabsiyo joogta ah oo badbaadadooda ama badbaadada mid ka mid ah qoyskoodo u dhow ama ka badan.

Diiwaaniyaha Ogeysiinta Dhibanaha
Liiska qarsoodiga ee ay isticmaaleen hay'adaha cadaalada dambiga si loogu ogeysiiyo dhibanayaasha wax ku saabsan dambiilaha, sida halka dacwada ay ugu jirto nidaamka maxkamada, haddii ay jiraan ka siideyn ku meelgaar ah oo xabsiga iyo goorta dambiilaha uu helayo siideynta sharuuda.

Ka diiwaangeli sharaxaadahaaga sarkaalka booliska ee masuulka ka ah dacwada.

Bayaanka dhibaatada dhibanaha
Diiwaanka oo sida dambiga u sameeyay dhibanaha. Bayaanka saameynta dhibanaha caadi ahaan waa qoraal, laakin waxaa ku jiri karo sawiro, sawiris ama gabay. Garsooraha waa inuu tixgeliyaa iyada markuu xukumayo dambiile. Dhibanaha way u aqrin karaan bayaanka maxkamada ka hor xukukista.

Qolka dhegaysiga dacwadaha

Jaantuskan waxuu ku tusayaa hal tusaale oo ah qaabka qolka maxkamda,iyo qofka aad arki karto.



1. **Garsooraha** wuxuu masuul ka yahay maxkamada. Waxay go'aansadaan haddii eedeysanaha uu damnbiile yahay, ama haddii ay jiraan xeer beegti, xeer beegtida ayaa go'aansaneyso midaan badelkii.
2. **Diiwaaniyaha** wuxuu ku caawiyaa garsooraha oo hubiyaa in nidaamyada maxkamada la raaco.
3. **Xeer beegtida** waxaa lagu sameeyaa illaa 12 qof oo go'aansado haddii eedeysanaha uu dambiile yahay. Ma ahan in dhammaan maxkamad saarida ay yihiin maxkamad saarida xeer beeqtida.
4. **Xeerbeegtida** waxay ku qaadaan dacwada matalaada Crown oo usoo bandhigaan dacwada si kasoo horjeedo eedeysanaha.
5. **Warbaahinta** waa joornaaliistayaal soo wargeliyaa dacwada.
6. **Qareenka eedeysanaha** wuxuu matalaa eedeysanaha.
7. **Eedeysanaha** wa qofka lagu soo eedeeyay dambiga.
8. **La jiraha maxbuuska** waxaa la jiro eedeysanaha.
9. **Muuqaalka bulshada** waa halka xubnaha bulshada iyo qoysaska dhibanaha iyo qoyska la noolyahay ay fariisan karaan, iyo halka marqaatiyada ay fariisan karaan kadib markii ay cadeynta bixiyaan.
10. **La talyaha dhibanaha maxkamada** wuxuu ku caawiyaa marqaatiga inuu fahmo maxkamada Marwalba kuma jirayaan qolka maxkamada.
11. **Qofka taagerada marqaatiga** waa qofka garsooraha ogolaaday inuu ku taageeri karo marqatiga maxkamada.
12. **Marqaatiga** wuxuu bixiyaa cadeynta waxa dhacay ama waxa ay ka ogyihiin dambiga.